
NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Dhaxlida Cudurka Dhiiga cas (SCT) Sickle Cell Trait (SCT) (Somali)

Dhaxlida waa wax gaar ah oo adiga kugu saabsan, sida timahaaga ama midibka indhahaaga. Sifooyinka waxay u gudbaan hoos (laga dhaxlo) waalidkaaga. Hida sidaha wuxuu qaadaa warbixin sameyso sifo. Dadka qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas (SCT) waxay qabaan 1 hida sidaha cudurka dhiiga cas iyo 1 hida side caadi ah.

- Lahaanshaha dhaxlida cudurka dhiiga cas **lama** mid ahan sida lahaanshaha cudurka unugyadaa dhiiga (SCD).
- Dhaxlida dhaxlida cudurka dhiiga cas waxaa loola jeedaa inaad u gudbin kartid dhaxlida cudurka dhiiga cas ama cudurka carruurtaada.
- Dadka qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas waxay ku noolyihiin nolol caadi ah. Badanaa malahan aastaamaha cudurka unugyada dhiiga cas.
- Dadka jinsiyad ama taariiq walba leh ayaa qabi karo dhaxlida cudurka dhiiga cas; si kastaba, waxay ku dhacdaa 1 oo 12 walboo Afrikaanka Ameerikaanka ah.




Illaha sawirka: Machadka Caafimaadka Qaranka, Machadka Qaranka ee Wadnaha, Sambabka, iyo Dhiiga

**Sawirka 1 aad:** Fursada waaladiinta leh SCT ee u gudbinayo carruurtooda.

 ©2012, Waxaa dib loo eegey 2022, Isbitaalka Carruurta ee Qaranka (Nationwide Children's Hospital) Sii socda…

## U gudbinta Dhaxlida Cudurka Dhiiga cas ama Cudurka Unyada Dhiiga

- Haddii aad dhaxashid **1 hida sidaha cudurka unugyada dhiiga (S)** iyo **1 hida sidaha, aan aheyn cudurka unugyada dhiiga (A)**, kadib waxaad qabtid dhaxlida cudurka dhiiga cas. Waxaad tahay sidaha cudurka unugyada dhiiga.
- Waa muhiim inaad ogaatid haddii lamaanahaaga uu qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas ama cudur. Haddii ay qabaan midkood hal, aad canug wada leedihiin uu qabi karo cudurka unugyada dhiiga cas (Sawirka 1).
- Haddii adiga iyo lamaanahaaga aad qabtiin dhaxlida cudurka dhiiga cas, canugaaga wuxuu qabi karaa:

| | |
|---|---|
| **AA** | – 25% fursada 2 hide side caadi ah iyo unugyada dhiiga cas ee caadiga ah. |
| **AS** | – 50% fursada 1 hide side caadi ah iyo 1 hida sidaha cudurka unuga. Kan waa dhaxlida cudurka dhiiga cas. Waxay yeelanayaan dhoor unugyada dhiiga jiran. |
| **SS** | – 25% fursada 2 hide side cudurka dhiiga; kan waa cudurka unuga dhiiga cas. |

- Haddii 1 waalid uu qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas iyo 1 waalid uu qabo burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn oo ay qabaan canug, canugaas wuxuu sidoo kale qabi karaa cudurka unuga dhiiga cas. Dhiig la'aanta aan caadiga aheyn waxaa ka mid noqon karo cudurka dhiiga ee dhaxalka ah, burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn C, ama burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn E.
- Mareykanka, dhammaan ilmaha dhasha ee cusub waxaa laga baaraa dhaxlida cudurka dhiiga cas iyo cudurka.

## DhibaaTooyinka dhaxlida cudurka dhiiga cas

- Marmar, dadka qabo dhaxlida cudurka dhiiga cas ayaa yeelan karo aastaamo la mid ah sida qof qabo cudurka unuga dhiiga cas. Tan ayaa caadi ahaan ku dhacdo sida waafaqsan xaaladaha daran, sida:
  - Ay yihiin dhirir aad u sareeyo (jooga).
  - Qabaan oksijiin hooseeyo ee jimicsiga daran. Tan waxay noqon kartaa wax sida xerada milatariga ama tababarka dhacdada ciyaaraha.
  - Aan ku laheyn biyo ku fillan jirkaaga (aad u fuuqbaxay).
  - Gal bad qoto dheer ama biyo gelida.

## Cudurka Unugyada Dhiiga

- Cudurka unuga dhiiga cas waxaa sababo burutiinka dhiiga aan caadiga aheyn. Burutiinka dhiiga ayaa ka qeyb ah unugyadeena dhiiga cas ee sidaa oksijiinta.
- Waa cudurka dhiiga nolosha dheer.
- Unugyada dhiiga caadiga ah way simanyihiin oo wareeg ah. Unugyada dhiiga cas ee jiran way adagyihiin, dhagdhag ah, oo u qaabeysan sida moos.
- Unugyada dhiiga jiran waxay ku qabaan dhibaato adag inay maraan xididaha yar ee dhiiga sababtoo ah qaabkooda. Way badan karaan oo xinjireeyaan xididaha. Markii ay xanibaada dhacdo, dhiiga ma geyn karo oksijiin qeybaha qaar ee jirka.

## Warbixin badan

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan dhaxlida cudurka dhiiga cas, la soo xiriir Sickle Cell Comprehensive Clinic ee Nationwide Children's Hospital ee (614) 722-3250.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa: https://www.cdc.gov/ncbddd/sicklecell/toolkit.html